



# Wararkii u Dambeeyey ee Ku Saabsan Af-Daboolida Marka La Joogo Gudaha Dhismayaasha PPS

Galab wanaagsan bulshada PPS,

Horraantii bisha Febraayo, Waaxda Caafimaadka Oregon (ODE) iyo Hay'adda Caafimaadka Oregon (OHA) waxay ku dhawaaqeen **isbedellada soo socda** ee gobolka oo dhan kuna saabsan sharciyadii af-saabka, iyada oo la qaadayo xeerkaa jideynayey in la daboolo afka marka lagu sugan yahay gudaha dhismayaasha bisha Maarso 31,2022. Haddaba shalayto, oo bishu ahayd Febraayo 24keeda, labada hay'adooda ee ODE iyo OHA waxay ku dhawaaqeen in la qaadayo shuruudihii afka lagu daboolayey [marka lagu sugan yahay goobaha gudaha ee dadweynaha iyo dugsiyada Oregon bisha Maarso 19keeda, 2022](#) . **Waqtigaa xadirka ah shuruudaha ah in la daboolo afka/sanka wali way ka sii shaqeynayaa gobolka oo dhan; shuruudaha af-saabka dugsiyadeena iyo dhismayaasha dugsiyada degmada.**

Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay ku guda jiraan in dib u eegis iyo qiimeyn lagu sameeyo hagitaankii ugu dambeeyey iyada oo la rajeynayo warar dheeraad ah kuwaasi oo gaarka oo gobolka Oregon uu sameyn doono [“Dugsiyo Diyaar ah, Arday Badqabta” Tiro Fikrado ah oo Kooban ee kuna Saabsan Adkeysiga](#). Waxaan sidoo kale galabta helnay tilmaamaha cusub ee CDC, kuwaasi oo qeexaya halbeegyada iyo habraacyada lagu dabcinayo shuruudaha afaabka marka lagu sugan yahay gudaha dhismayaasha.

Waxaan la shaqeyneynaa anaka oo garabsaneyna Caafimaadka Dadweynaha Degmada Multnomah (MCPH) iyo Addeegga Waxbarashada Degmada Multnomah (MESD) sidii aan dib eegis u sameyn lahayn tilmaaha gobolada iyo dalka oo dhan iyo macnaha ay u sameyneyso bulshadeena. Waxaan rajeyneynaa in Caafimaadka Dadweynaha Degmada Multnomah ay soo saari doonaan tallo bixin iyo /ama shuruudo la xiriira af-doolida marka lagu sugan yahay gudaha dhismayaasha sida ugu degdeg badan. Waxaan rajeyneynaa inaan idinla wadaagno shaqaalaheena iyo qoysaskeena wixii cusub ee soo kordha todobaadka soo socda.

Mahadsanidin,

**Jonathan Garcia**

| Madaxa Xafiiska Guddoomiyaha Waxbarashada  
Dugsiyada Dadweynaha Portland